# 10 Talo oo waaweyn oo ku saabsan Nidaamka Waxbarashada Gaarka ah iyo Qorshayaasha Waxbarashada Shakhsiyanka ah (IEPs)

Top 10 Tips for the Special Education Process and Individual Education Plans (IEPs)

## 1. Ka ogow wax walba ood ka ogaan karto nidaamka Waxbarashada Gaarka ah

Nidaamka waxbarashada gaarka ah waa lagu wareeri karaa. Haddii aad u baahan tahay Qorshe Waxbarasho oo Shakhsiyanka ah (IEP) oo ardaygaagu leeyahay, waa ay ku caawin inaad ogaato dhamaan waxa aad ka ogaan karto nidaamka. Ogaanshaha waxa socda iyo waxa ay dadku ka hadlayaan waxa ay kaa caawin kartaa inaad dareento la socod ah waxa jira. Hel caawimaad si aad u ogaato sida uu nidaamku yahay iyo waxa macnahoodu yahay kalmado iyo oraahdo kala duwan. Waxaa jira xiriiro (link) aakhirka warqadan xogta aruursan ku qoran oo ka hadlaya ilaha kaa caawin kara inaad ogaato waxyaabahaa.

## 2. Lahow Qorshe Waydiina Su'aalo

Waxa aad u taqaan ardaygaaga si ka fiican cid walba! Waa aad taqaan waxa u shaqeeya iyo waxa aan u shaqeyn. Kulanka kooxda (IEP) gu waa fursad aad adigu kula wadaagi karto dadka kale waxa aad og tahay. Ka sii fakar waxa aad rabto inaad tiraahdo iyo cawaaqibyada aad rabto ka HOR kulanka. Waa ay wacnaan kartaa inaad wax sii qorto, si kolkaa aadan u ilaabin. Xilliga kulanka, waydii su'aalo kolka aadan fahmin wax ama aad rabo in wax si fiican laguugu sharxo. Waydii sababtu uu iskuulku u soo jeedinayo in la sameeyo waxyaabaha qaarkood. Waydii in ay eegeen ama isku dayeen waxyaabo kale oo la dooran karo.

## 3. Hel qof Shaqaale ah oo Yaqaan Daneeyana Ardaygaaga

Waxaa jira badanaa qof shaqaale ah oo u muuqda inuu runtii fahmo daneeyana ilmahaaga. Qofkaa shaqaalahi ahi wuxuu noqon karaa:

- xirfadle-gargaare
- macallin
- maamulaha kiisaska iskuulka
- maamule
- cid kale oo iskuulka joogta



Hel qof shaqaale ah ama cid kale oo sidda ugu fiican ula shaqeeya ardaygaaga waydiina inay qayb ka noqdaan qorsheynta (IEP). Xiriir wacan oo shaqeynaya oo lala yeesho qof weyn oo la aaminsan yahay oo danayn lehi waxa ay muhiim u noqon kartaa ku najaxida iskuulka ee ilmahaaga.

## 4. Diyaar Ahow Iskuna Duw Qoraaladda

Nidaamka waxbarashada gaarka ah waxaa ku lug leh qoraalo badan! Waa muhiim in mar walba la isku duwo qoraaladaa. Qoraaladdu waxa ay kaa caawin inaad u mudacdo ardaygaaga. La wadaag dadka kale qoraaladda gargaara waxyaabaha aad ka codsanayso kooxda (IEP).
Qoraaladdaa waxa ay noqon karaan sidda waxyaabaha:

- IEPs
- qaymaynaha
- ogaysiisyada iskuulka ka yimaada
- akhbaar kale oo ku saabsan ardaygaaga

## 5. Xooga Saar, Najaxida, Hor-u-Marinta Xirfadaha iyo Horukaca

Haddii arday uu ka helo waxyaabo iyo xarakaadyo iskuulka ka jira oo uu ku fiican yahay, waxa ay u badan tahay inay isku kalsoonaadaan ayna ku faraxsanaadaan iskuulka. Isku day inaad ogaato waxyaabahaa. Xooga saar ardayga xirfadihiisa noloshada, tacliinta yo bulshada. Waxaad kaloo codsan kartaa inaad hesho cusboonaysiinyo qoraal ah oo ku saabsan horukaca ardayga mar walba.

## 6. Waydiiso Iskuulka Ogaysiisyo Qoraal ah



Iskuuladdu waa inay siiyaan waalidka ogaysiisyo qoraal ah oo ku saabsan go'aamadda muhiimka ah iyo sababaha go'aamadaa. Waydiiso iskuulku inuu go'aamadiisa iyo sharaxaadihiisa uu ka dhigo qoraalka la yiraa "Ogaysiiska Hore ee Qoraalka ah" ama (PWN). Arrintani runtii waa jid wacan oo lagu fahmi karo waxa uu iskuulku sameynayo.

## 7. Ogow Xaquuqdaadda, iyo Muddooyinka kama Dambaysta ah!

Maadaama aad u tahay waalid ilmo iin leh, waxa aad leedahay xaquuqo badan. Xuquuqahaas waxaa ku jira waxyaabaha sidda:

- ka helida ogaysiisyo iskuulka
- ka haysiga nuqul galka tacliinta ee ardaygaaga
- helida iyadoo qoraal ah waxyaabaha iskuulku soo jeediyo oo ku taliyo
- awoodida inaad ku raacdo ama aadan ku raacin adeegyada iyo talaabooyinka

**Arrin Muhiim ah!** Waxa aad haysataa 14-cisho laga bilaabo taariikhda IEP ga la soo jeediyey oo ah inaad ku raacdo ama aadan ku raacin qorshaha. Haddii aadan uga jawaabin qoraal ahaan 14-kaa-cisho gudahood, soo jeedinta iskuulku durba ayey u dhaqan geli, jeclow ama ha jeclaan!

## 8. Waa aad ka mudici kartaa go'aanka ama soo jeedinta iskuulka

Waxaa jira siyaabo badan oo kala duwan oo looga mudici karo mowqifka, go'aanka ama soo jeedinta iskuulka. Waxaa jira waxyaabo ah sidda:

- qabashada kulan ku saabsan qorshaha (IEP)
- sameynta "shir waan-waaneed"

- ka qaybgalka dhexdhexaadin
- codsiga kulan la "daadihiyo" oo ku saabsan IEP
- ka xareysi cabasho hay'ad dowli ah
- codsiga dacwo dhagaysi ee uu qaado xaakim

Waxaa aad ka ogaan kartaa wax badan oo ku saabsan sidda loo sameeyo waxyaabahaa ilaha akhbaarta ee qaybtii hore ee la soo dhaafay.

## 9. Is Daji intii Suurtagal ah Isticmaalna Siyaabo kala Duwan Si aad Wax uga Qabato Dhibka

Marmarka qaarkood dhibaatooyin ayaa dhaca waalidiinta iyo shaqaalaha iskuulkuna waa ay ka xanaaqaan. Waxaa jira jidad la isku dayi karo si xaaladahaa loo dejiyo intii suurtagal ah. Kuwani waa qaar ka mid ah ra'iyo la adeegsan karo:

- Kulanadda ama la hadlida iskuulka ka hor, ka sii fakar waxyaabaha aad rabto inaad aragto inay dhacaan hubina inaad sharxi karto waxa ay waxyaabahiisi yihiin.

- Ka fakar siyaabo kala duwan oo aad uga hadli karto walaacaaga iyo hadafyadaadda.

- Si degan oo cad u hadal.

- Isku day in kooxda iskuulku ay qayb ka noqoto hanaanka xalinta khilaafaadka.

- Haddii kuwani shaqeyn waayaan, eeg Taladda xigta!

## 10. La Xiriir Rugta Sharciyada ee Naafadda Minnesota (Minnesota Disability Law Center [MDLC])

Xafiiskayagu waxaa dhici karta inuu ku caawiyo. Waxaa leenahay qareemo iyo taakuleeyeyaal u leh khibrad balaaran oo dhinacyo badan ah waxbarashada gaarka ah. Si aad u codsato caawimaad, wac:

Beledyadda: (612) 334-5970
Telefoonka lacag la'aanta ah: 1-800-292-4150

Dhamaan wicitaanadda kale oo dhan: (612) 332-1441



Waxa aan leenahay is-qorid gobolka oo dhan ah oo khadka ah ee https://mylegalaid.org/get-help. Hoos u wad ilaa iyo batoonka buluuga ah ee Khadka, ka Dalbo "(Apply Online)" kolka aad gaarto.

## Ma Rabtaa Inaad Wax Badan Ogaato?

- Warqadda Xogta Aruursan ee MDLC: https://www.lawhelpmn.org/so/maktabada-iskaa-wax-looga-baarto/naafada

- Su'aalaha inta badan la Is Waydiiyo (FAQs) ee Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota (Minnesota Department of Education): http://education.state.mn.us/MDE/dse/sped/caqa/

- Rugta Daabicitaanadda ee PACER (PACER Center Publications): http://www.pacer.org/publications/

- Eraybixinta Kalmadaha iyo Soo Gaabinada: http://www.specialeducationguide.com/special-education-dictionary/

- Aqoon iswaydaarsiga MDLC ee aasaaska Waxbarashada Gaarka ah: https://youtu.be/uBrdCj4OWxA

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**